# XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE DOWLADDA JUBALAND

# WARBIXIN SANADEEDKA 2024

# TUSMO


Fariinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowladda Jubaland .......... 3

Hordhac .......... 4

Waxqabadka & Guulihii uu Xafiiska Gaaray .......... 5

Shirarka & Tababarada Xafiiska 2024 .......... 8

Caqabadaha Xafiiska .......... 17

Hiigsiga Xafiiska ee Sanadka 2025 .......... 19

Qiyamka Asaasiga ah ee Xafiiska .......... 22

Kiisaska Soo Gaaray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud 2024 .......... 24

Gabagabo .......... 29

# Fariinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowladda Jubaland



Mudanayaal iyo Marwooyin,

Waxaan ku faraxsanahay inaan idin soo bandhigo warbixin sanadeedka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland, sanadkan 2024, waxay si qoto dheer u faahfaahinaysaa waxqabadka, guulaha, caqabadaha, iyo qorsheyaasha mustaqbalka ee Xafiiskayaga.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu si firfircoon u shaqeynayaa si loo xoojiyo ka hortagga iyo ka dabatagga danbiyadda, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo la dagaalanka danbiyada qorshaysan, musuqmaasuqa, tacaddiyada jinsiga, iyo tahriibka. Dadaalladaani waxay kaalin weyn ka ciyaarayaan xoojinta sarreynta sharciga iyo cadaaladda.

Dhammaan hawlaha Xafiiska waxaa saldhig u ah habsami u socodka cadaalad-dambiyeedka. Waxaa muhiim ah in aan sameyno hab dacwad-oogis xirfadaysan oo aqoon leh, si garsoorku u meelmariyo xeerarka ciqaabta iyo shuruucda kale ee dowladda. Dib-u-habaynta iyo kor u qaadista adeegyada Xafiiska waxay ku saleysan tahay baarista dambiyada iyo dambi-soo oogista, iyo sidoo kale xoojinta danbibaarista.

Xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee jubbaland wuxuu diyaariyay qorshe istiraatiiji ah oo dhameystiran oo ku saleysan Qorshaha Horumarinta Xafiiska 2025-2030.

Ujeedada qorshahan waa in la kordhiyo tayada adeegyada aan bixino, iyadoo la filayo in sanadkan aan ka xaqiijin doono qodobbada istiraatiijiyadda ee hiigsanayso sanadaha 2025-2030.

Ugu dambeyn, waxaan u mahadnaqayaa guddiga ka qayb qaatay diyaarinta warbixintan, iyo dhammaan shaqaalaha dedaalka iyo kartida u leh hirgelinta istiraatiijiyadda Xafiiska. Waxaan idiin rajeynayaa sanad wacan oo nabad ah iyo caafimaad.

Wabillaahi Tawfiq.

# Hordhac

Dhismaha iyo Asaasidda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowlad Goboleedka Jubaland

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowladda Jubaland (XXGDJ) waxaa la aasaasay iyadoo la raacayo xeerar dalka iyo midka dowlad goboleedka jubaland, waxaana lagu saleynayaa habka garsoorka ee dalka iyo midka dowlad goboleedka jubaland,

In kasta oo uu ku shaqeynayo xeerar dhisan, haddana waxaa soo ifbaxaya baahiyo isbeddel oo ku yimaada qaab-dhismeedka iyo habsami u socodka adeegyada sharciga, iyadoo loo marayo nidaam casriga ah.

Dadaallada dib-u-eegista Dastuurka ku-meelgaarka ah ee Jubaland, oo ay wadaan hay’adaha mas’uulka ka ah, waxay rajeynayaan in Dastuurka cusub uu wax ka beddelo nidaamka cadaaladda, isagoo la jaanqaadaya nidaamyada garsoorka ee caalamiga ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in la isku dheellitiro laba ujeeddo oo isbarbar socda: midda koowaad waa in xafiisyada dambi-oogista ee bulshada/degaanka ay ka tarjumaan danaha gaarka ah ee deegaanka, halka midda labaad ay tahay in la helo tababarro, halbeegyo, iyo qaab siyaasadeed oo mideysan oo lagu dhaqangelin karo dalka oo dhan.

Waajibaadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland

Waajibaadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland waxaa lagu qeexay xeerar muhiim ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin Xeerka Habka Ciqaabta (XHC) iyo xeerar kale oo muhiim ah.

Xafiiska XXGDJ waa hay’ad madax-bannaan oo muhiim u ah dawladnimada, dabaqidda xeerarka iyo shuruucda, iyo sarreynta sharciga.

Waajibaadkiisa iyo mas’uuliyadiisa waxaa ka mid ah:

- Dacwo-oogista, ka hortagga, iyo ka dabatagga danbiyada.

- Hagista baarista dacwadaha ciqaabta ah iyo maxkamadayntooda.

- Ilaalinta iyo dhowridda xuquuqaha kala duwan ee muwaadiniinta.

- Xaqiijinta sarreynta sharciga iyo ku dhaqanka xeerarka dalka.

- Kormeeridda xaaladaha nololeed iyo ilaalinta xuquuqda dastuuriga ah ee maxaabiista.

- Xaqiijinta xuquuqda agoonta iyo dadka nugul, iyo ilaalinta danta guud ee cadaaladda.

Xafiisku wuxuu si hagar la'aan ah ugu adeegaa shacabka Jubaland, isagoo u taagan sidii loo xaqiijin lahaa cadaaladda iyo xasiloonida bulshada.

## Waxqabadka & Guulihii uu Xafiiska Gaaray

Waxqabadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland sanadkan 2024 ayaa waxaa diiradda lagu saaray ka jawaabidda baahiyaha caddaaladeed iyo ilaalinta nidaamka sharciga ee bulshada Jubaland. Waxqabadka ayaa loo qorsheeyey siyaabo kala duwan si loo xaqiijiyo in la gaaro yoolalka muhiimka ah ee xafiiska. Faahfaahinta waxqabadkan waxaa ka mid ah:

1. Qaadashada Xeer Ilaaliyeyaal Cusub: Si loo xoojiyo awoodda xafiiska loona daboolo baahida loo qabo caddaalad hufan oo degdeg ah, waxaa sanadkan la qaatay 14 xeer ilaaliyayaal & 3 Kaaliyeyaal cusub oo loo kala qaybiyey degmooyinka iyo xarumaha kala duwan ee Jubaland. Kuwaas oo kala ah:
    - 2 Kaaliye Xarunta Ee Degmadda Kismaayo
    - 2 xeer ilaaliye iyo 1kaaliye oo loo qaatay degmada Dhobley ee gobolka Jubada Hoose.

    10 xeer ilaaliye oo loo kala qaybiyey degmooyinka gobolka Gedo, kuwaas oo kala ah:

3 xeer ilaaliye oo degmadda Garbahaarey ah.

2 xeer ilaaliye oo degmadda Beledxaawo ah.

2 xeer ilaaliye oo degmadda Baardheere ah.

2 xeer ilaaliye oo degmadda Luuq ah.

2 xeer ilaaliye oo degmadda Doolow ah.

2. Xoojinta Tababarada iyo Tayaynta Shaqaalaha:

   Tababarada iyo tayaynta shaqaalaha cusub iyo kuwa hore ayaa kamid ah waxyaabaha lagu soo kordhiyay waxqabadka sanadkan. Xafiisku wuxuu qabtay tababaro loogu talagalay in shaqaalaha lagu baro xirfadaha muhiimka ah ee la xiriira xeer ilaalinta iyo maaraynta kiisaska dambiyada. Tababaradan ayaa xoogga lagu saaray:

3. Fahamka Qotada Dheer ee Xeerarka Dalka:

   Shaqaalaha ayaa loo tababaray fahamka iyo adeegsiga xeerarka dalka ee caddaaladda lagu hagayo si loo gaaro garsoor waafaqsan sharciga.

4. Dagaalka ka Dhanka ah Dambiyada Culus:

   Iyadoo la tixgelinayo kiisaska dambiyada culus ee gobolka ka jira, shaqaalaha ayaa lagu baraarujiyay hababka iyo xirfadaha lagula dagaallamo dambiyada sida musuqmaasuqa, dambiyada dhanka maaliyadda, iyo kuwa ku lidka ah danaha bulshada.

5. Maamulka Kiisaska iyo Dabagalka Caddeymaha:

   Tababarada ayaa sidoo kale xoogga lagu saaray maamulka iyo diiwaangelinta kiisaska iyadoo la xoojinayo awoodaha la xiriira raadinta, ilaalinta, iyo maareynta caddeymaha si loo helo go’aano caddaalad ah oo waafaqsan sharciga.

6. Dabagalka iyo Maareynta Kiisaska Dambiyada:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland ayaa sanadkan dadaal weyn ku bixiyay dabagalka kiisaska kala duwan ee dembiyada, kuwaas oo u baahan maarayn iyo xal degdeg ah. Kiisaska ugu badan ayaa ahaa kuwa la xiriira dambiyada guud iyo kuwa maaliyadeed, kuwaas oo la xoojiyay dabagalka iyo xeer ilaalinta si loo xaqiijiyo caddaalad ku dhisan caddeymo iyo sharci. Xafiisku wuxuu si gaar ah uga shaqeeyay:

7. Hagida Nidaamka Maamulka Dacwadaha:

   Waxaa la sameeyay hab waafaqsan nidaamka caddaaladda kaas oo dhammaan kiisaska lagu soo diiwaan gelinayo loona dhigayo qaab nidaamsan si loo hubiyo inay si habsami leh u socdaan.

8. Fududeynta Helitaanka Adeegyada Sharciga:

   Dhammaan degmooyinka Jubaland waxaa loo suurtogelinayay inay helaan adeegyo dambi baaris iyo xeer ilaalin buuxa, taas oo fududeysay in kiis kasta lagu xalliyo wakhti haboon iyadoo la ilaalinayo danta guud ee bulshada.

9. Kor U Qaadista Wacyiga Bulshada:

   Si loo abuuro bulsho garanaysa xuquuqdeeda iyo nidaamka caddaaladda, xafiisku wuxuu qabtay hawlo wacyigelin ah oo bulshada loogu soo bandhigayay nidaamka sharciga iyo xuquuqda sharciga ah ee ay leeyihiin. Wacyigelinta ayaa muhiim u ah sidii loo abuuri lahaa bulsho ka feejigan dembiyada isla markaana soo tabinaysa wax kasta oo dhibaato ku ah xasilloonida iyo caddaaladda.

10. Ka Qayb Qaadashada La Dagaallanka Musuqmaasuqa:

   Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland ayaa si gaar ah diiradda u saaray la dagaallanka musuqmaasuqa, isagoo xafiisku ku dadaalay inuu sameeyo hab-raacyo cad oo looga hortagayo musuqmaasuqa kana shaqeynaya ilaalinta hufnaanta hay'adaha kala duwan ee Jubaland.

Shaqaaluhu waxay ka hawlgaleen dhisidda nidaamyo cusub oo kor loogu qaadayo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.

## Shirarka & Tababarada Xafiiska 2024

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland wuxuu sanadkan 2024 qabtay tababaro muhiim ah oo loogu talagalay in sare loogu qaado xirfadaha shaqaalaha si loo xaqiijiyo in adeegyada xafiisku ay yihiin kuwo tayaysan oo waafaqsan shuruucda caddaaladda. Tababaradani waxay qayb ka ahaayeen qorsheyaasha xafiiska ee lagu hagaajinayo hufnaanta, xirfadlenimada, iyo awoodda shaqaalaha. Hoos waxaa ku xusan tababaradaas iyo ujeedooyinka mid kasta:

- Feb 04 – 08, 2024, Tababar Ku Saabsan Xeerka Habka Ciqaabta soomaaliyeed oo loo qabtay Garsoorayaasha iyo xeerilaaliyayaasha Garsoorka Jubaland.



Feb 10 – 14, 2024, Tababar Ku Saabsan Xeerka Ciqaabta soomaaliyeed soomaaliyeed oo loo qabtay Garsoorayaasha iyo xeerilaaliyayaasha Garsoorka Jubaland.




- Feb 22, 2024, Wafdi Heer qaran ah oo ay horkacayaan Gudoomiyaha Maxkamadda Sare Ee Soomaaliya, Xeerilaaliyaha Guud ee qaran iyo Agaasimaha Machadka Tababbarka Garsoorka Soomaaliya ayaa maanta soo gaaray magaalada Kismaayo.



- Feb 24, 2024, Shirka hay'adaha garsoorka dalka ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed.




- May 26 – 30, 2024, Tababar Ku Saabsan Xeerka habka madaniga.



- May 26 – 30, 2024, Tababar Ku Saabsan Xeerka habka madaniga.



- July 05, 2024, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Jubbaland Avv Nuura-diin Maxamed Khaliif oo ay wehlinayaan Garsooreyaal, Xeer-ilaaliyaal heer Federaal, heer Dowladd Gobolleed iyo agaasimaha machadka tabobarka soomaaliya (JTI) oo tababar iyo aqoon is-weydaarsi u jooga dalka Talyaaniga.



- July 13 - 16, 2024, xeer ilaaliye ku xigeenka 1aad ee jubbaland oo ka qeyb galay Madasha Hoggaaminta Wax ku-oolka ah ee Bahda Caddaaladda Soomaaliya oo lagu daahfuray magaalada Kismaayo.




- July 15, 2024, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Ee Dalka, & Xeerilaaliyaha Guud ee Qaranka Booqasho ku tagay Xarunta Xafiiska Xeer-ilaalinta Jubaland



- Augst 04, 2024, Xeer ilaaliyaha Guud ee Jubaland Nuuradiin Maxamed Khaliif, ku xigeenkiisa iyo qaar ka mid ah howl-wadeenada xafiiska oo gaaray Degmadda Doolow ee gobolka Gedo



- Augst 05, 2024, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Jubaland mudane Nuuradiin Maxamed Khaliif ahna gudoomiye ku xigeenka Gudiga adeega garsoorka, ku xigeenkiisa iyo qaar ka mid ah howl-wadeenada xafiiska oo gaaray oo uu soo dhaweyn u sameyay Maamulka Gobolka Gedo.



- Augst 25 – 29, 2024, Habraaca Dacwadaha ciqaabta ah.



- Sep 17, 2024, Xeer-Ilaaliyaha Guud Ee Jubbaland oo Shir Gudomiyay Shirka Billaha Ah Ee Udhaxeya Boliiska Iyo Xafiiska Xeer-Iaalinta.



- Sep 17, 2024, Xeer-ilaaliyaha guud ee Dawladda Jubaland, qaar ka mid ah ku xigeenadiisa, oo kormeer ku tagay xabsiga dhexe ee Degmadda Kismaayo.



- Sep 17, 2024, Xeer-ilaaliyaha guud ee Dawladda Jubaland, qaar ka mid ah ku xigeenadiisa, oo kormeer ku tagay xabsiga Qeybta guud ee booliska gobolka jubada hoose.



- Sabti 09 Nov 2024 kismayo, Xeer ilaliyaha guud ee Dawlada Jubaland ka qeygalay dhaarinta Garsoorayaasha iyo Xeer-ilaalinta cusub ee Gobolka Gedo



- Sabti 10 Nov 2024 kismayo, Xafiiska xeer ilaaliya guud ee jubbaland xubna ka socda oo goob joog ka ahaa baabi'inta Maandooriye gaaray 76 duub oo xashiish ah, kaas lagu soo qabtay ilaa 5 eedeysane Tr. 10/10/2024



## Caqabadaha Xafiiska

Inkasta oo xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland uu dadaal xooggan ku bixiyay kor u qaadista cadaaladda iyo xoojinta nidaamka sharciga, haddana waxaa jira caqabado iyo duruufaha soo wajahaya oo saameyn ku leh awoodda iyo waxtarka xafiiska. Caqabadahaasi waa kuwo culeys weyn ku haya shaqooyinka xafiiska iyo dadaalka lagu doonayo in bulshada loo helo cadaalad waarta. Faahfaahinta caqabadahaas waxaa ka mid ah:

- Tirada Shaqaalaha oo Aan Ku Filneyn:
  Inkastoo xafiisku uu ku guuleystay in shaqaale cusub la qaatay sanadkan, haddana tirada guud ee shaqaalaha xafiiska ayaa wali aad uga hooseysa heerka loogu baahan yahay si loo daboolo baahiyaha cadaaladeed ee gobolka oo dhan. Gobolka Jubaland ayaa leh degmooyin kala duwan oo ay ku yaallaan maxkamado iyo goobaha xeer ilaalinta, balse tirada xeer ilaaliyeyaasha iyo shaqaalaha taageera ayaa aan weli ahayn mid buuxinaysa baahida gobolka. Xafiisku wuxuu u baahan yahay shaqaale dheeraad ah si uu si joogto ah ugu dabagalo kiisaska maxkamadaha kala duwan ee gobollada iyo degmooyinka Jubaland.
- Xadidanidda Agabka Shaqo iyo Adeegyada Xafiiska:
  Caqabada kale oo muhiim ah ayaa ah helitaanka agab shaqo oo ku filan iyo adeegyo casri ah oo taageera shaqada xeer ilaalinta. Qalabka muhiimka ah sida xarumo ammaan ah oo lagu kaydiyo caddeymaha, qalabka teknoolajiyadda casriga ah ee loo adeegsado kaydinta iyo la socoshada macluumaadka kiisaska, iyo gaadiid ku filan oo lagu gaari karo goobaha fogfog ayaa inta badan ku yar xafiiska. Xadidanidda agabkani waxay caqabad ku tahay waxtarka shaqaalaha iyo guud ahaan howlgalka xafiiska oo dhan.
- Tirada Kiisaska oo Aad U Badan iyo Baahida Cadaaladeed ee Degmooyinka:

Gobollada iyo degmooyinka Jubaland waxaa ka jira kiisaska kala duwan ee dembiyada, kuwaas oo ku badan tahay xafiiska iyadoo inta badan kiisaskani yihiin kuwo wakhti iyo dabagal badan u baahan. Kiisaska ayaa isugu jira dembiyada guud, kuwa maaliyadeed, iyo kuwa la xiriira danbiyada culus ee bulshada saameynaya. Tirada kiisaska oo badan ayaa sabab u noqotay in culays xoogan lagu arko shaqaalaha, taas oo hoos u dhigaysa awoodda shaqaalaha inay si waxtar leh ugu maaraystaan dhammaan kiisaska xafiiska soo gaara.

- Caqabado La Xiriira Dhaqaale iyo Taageero Kaabayaasha Shaqo:

  Dhaqaalaha xafiiska ayaa ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee saameeya waxqabadka. Miisaaniyadda la siiyo xafiiska ayaa inta badan aan ku filneyn in lagu daboolo dhammaan baahiyaha adeegyada caddaaladeed iyo xeer ilaalinta gobolka. Kharashaadka la xiriira tababarada shaqaalaha, kordhinta adeegyada, hagaajinta qalabka, iyo kheyraadka kale ee loo baahan yahay ayaa u baahan miisaaniyad dheeraad ah oo ku filan. Xafiisku wuxuu u baahan yahay taageero dhaqaale oo joogto ah si loo kordhiyo adeegyada lana hubiyo inay ku filan yihiin bulshada.

- Baahida Wacyigelinta Bulshada iyo Kordhinta Kalsoonida Shacabka:

  Bulshada Jubaland ayaa inta badan la kulanta caqabado ku saabsan fahamka nidaamka sharciga iyo xuquuqda sharciga ah ee ay leeyihiin, taas oo u baahan in si joogto ah loo qabto wacyigelin iyo baraarujin bulshada loogu soo bandhigayo sida loo maro nidaamka garsoorka. Maadaama aysan bulshadu si buuxda ugu kalsoonaan karin nidaamka garsoorka iyo xeer ilaalinta, caqabadan ayaa saameyn ku yeelata xiriirka xafiiska iyo bulshada iyo sidoo kale u fududeynta helitaanka xogta iyo caddeymaha kiisaska. Wacyigelinta ayaa muhiim u ah in bulshada ay faham buuxa ka hesho nidaamka sharciga iyo sidii ay ugu soo tabin lahaayeen wixii dambi ah si ay u caawiyaan caddaaladda.

## Hiigsiga Xafiiska ee Sanadka 2025

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland wuxuu sanadkan 2025 qorsheynayaa inuu hirgeliyo qorshayaal ballaaran oo loogu talagalay horumarinta nidaamka caddaaladda iyo in si buuxda looga jawaabo baahiyaha caddaaladeed ee bulshada Jubaland. Hiigsiga sanadka 2025 wuxuu xoogga saarayaa in la xoojiyo nidaamka xeer ilaalinta, kor loo qaado tayada shaqaalaha, la hagaajiyo adeegyada bulshada, lagana hortago caqabadaha soo food saara xafiiska. Qodobada ugu muhiimsan ee hiigsigan lagu doonayo inay qayb weyn ka noqdaan waxqabadka xafiiska waxaa ka mid ah:

- ❖ Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu hiigsanayaa in 2025 uu noqdo mid si buuxda ugu shaqeeya nidaam hufan oo ku saleysan caddaalad iyo daahfurnaan. Hiigsigan wuxuu ku saabsan yahay inay bulshada Jubaland ay helaan adeegyo caddaaladeed oo tayeysan, la isku halayn karo, loona hirgeliyaa qaab si joogto ah uga jawaabaya baahiyaha bulshada iyo xaaladaha dembiyada ee la xiriira nabadgelyada iyo xasilloonida gobolka

1. Kor U Qaadista Tayada iyo Tirada Shaqaalaha

   Hiigsiga ugu weyn ee xafiisku leeyahay 2025 waa inuu sii kordhiyo tirada shaqaalaha oo noqdaan kuwa aqoon sare leh, kuwaas oo ku filnaan kara dabagalka dhammaan kiisaska gobolka ka jira. Ujeedadu waa in xafiisku yeesho shaqaale tayo sare leh oo diyaar u ah inay ku shaqeeyaan degmo kasta oo Jubaland ah, taas oo u suurtogelinaysa in adeegyada xafiiska gaaraan dhammaan bulshada. Qaadashada xeer ilaaliyeyaal cusub iyo in tababaro joogto ah la siiyo shaqaalaha ayaa fure u ah qorshahan, iyadoo diiradda la saarayo in shaqaalaha cusub ay yeeshaan xirfado iyo aqoon la xiriirta xeerka iyo cadaaladda.

2. Xoojinta Nidaamka Maaraynta Kiisaska iyo Diiwaangelinta

   Xafiisku wuxuu qorsheynayaa inuu hirgeliyo nidaamyo casri ah oo fududeynaya diiwaangelinta iyo maaraynta kiisaska, kaas oo adeegsanaya

teknoolajiyadda si loo kordhiyo hufnaanta iyo waxqabadka. Waxaa lagu talo jiraa in la sameeyo nidaam dijital ah oo lagu kaydinayo dhammaan kiisaska si loo suurtogaliyo in si sahlan looga shaqeeyo lagana warhayn karo xaaladda kiis kasta. Nidaamkan wuxuu kordhin doonaa isla xisaabtanka iyo caddaaladda, isagoo sidoo kale yareyn doona waqti lumis iyo khaladaadka laga yaabo inay ka dhacaan maamulka kiisaska.

3. La Dagaalanka Musuqmaasuqa iyo Hufnaanta Xafiiska

   Sanadka 2025, xafiisku wuxuu ujeedadiisa ka dhigay inuu si weyn uga shaqeeyo la dagaalanka musuqmaasuqa iyo in nidaamka caddaaladda lagu hago daahfurnaan buuxda. Xafiiska wuxuu sameyn doonaa nidaamyo iyo habraacyo cad oo looga hortagayo musuqmaasuqa dhexdiisa iyo laamaha kale ee maamulka Jubaland, isagoo abuuraya nidaamyo isla xisaabtan iyo dabagal ah oo lagu hubiyo in cadaaladda loo wada siman yahay. Wacyigelinta bulshada iyo kobcinta kalsoonida shacabka ee nidaamka xeer ilaalinta ayaa qeyb muhiim ah ka noqon doonta howlaha la xiriira la dagaalanka musuqmaasuqa.

4. Xoojinta Amniga Xafiisyada iyo Ilaalinta Caddeymaha

   Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu u baahan yahay inuu hirgaliyo nidaamyo lagu xaqiijinayo amniga caddeymaha iyo ilaalinta xafiisyada ay dadka ku shaqeeyaan. Amniga xafiisyada iyo badbaadada caddeymaha muhiimka ah waa arrin mudnaan sare leh, taas oo ka hortagi karta in caddeymaha kiisas badan la lunsado ama lumaan. Ujeeddada sanadka 2025 waa in la helo xarumo ammaan ah oo qalabaysan, taas oo keeni karta in kiisaska si buuxda loo xalliyo loona keydiyo caddeymaha si caddaaladda loo helo.

5. Wacyigelinta iyo Abaabulka Bulshada

   Xafiisku wuxuu sidoo kale xoogga saari doonaa inuu ballaariyo wacyigelinta bulshada ee ku saabsan xuquuqda sharciga iyo sida loo isticmaalo nidaamka cadaaladda. Ujeedadu waa in la abuuro bulsho

garanaysa xuquuqda sharciga ah ee ay leeyihiin iyo sida ay ula xiriiri karaan xafiiska xeer ilaalinta haddii ay dhacdo xaalad caddaalad darro ah. Qorshaha 2025 wuxuu leeyahay in la qabto siminaarro iyo kulan-wacyigelin ah oo bulshada loogu soo bandhigayo doorka muhiimka ah ee xafiisku ku leeyahay ilaalinta danaha bulshada iyo sida ay shacabka uga qeyb qaadan karaan la dagaalanka dembiyada.

6. Xoojinta Tababarada iyo Tayaynta Shaqaalaha

   Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu ku tallaabsan doonaa qorshe uu tababar joogto ah ku siinayo shaqaalaha xafiiska, gaar ahaan kuwa cusub iyo kuwa ka howlgala maxkamadaha kala duwan. Xafiisku wuxuu qorsheynayaa inuu tababaro dheeraad ah ku bixiyo barashada xeerarka cusub, xirfadaha la xiriira maareynta kiisaska, iyo sidii loo heli lahaa caddaalad hufan. Tababaro joogto ah ayaa muhiim u noqon doona sidii shaqaalaha loogu diyaarin lahaa inay yeeshaan waaya-aragnimo dheeraad ah oo si hufan ay ugu shaqeeyaan nidaamka cadaaladda iyo ilaalinta danta guud.

7. Horumarinta Kaabayaasha Shaqo iyo Teknoolajiyadda Casriga ah

   Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu hiigsanayaa inuu ku shaqeeyo kaabayaal casri ah iyo qalab taageeraya waxqabadka shaqaalaha si loo kordhiyo waxtarka adeegyada. Sanadka 2025, xafiisku wuxuu qorsheynayaa inuu balaadhiyo adeegsiga teknoolajiyada casriga ah, sida nidaamyada elektaroonigga ah ee lagu maareeyo kiisaska iyo qalab casri ah oo ay shaqaaluhu ku adeegsadaan habka maaraynta. Tani waxay fududeynaysaa in si degdeg ah loogu shaqeeyo kiisaska loona sameeyo raadraac sax ah.

## Qiyamka Asaasiga ah ee Xafiiska

Qiyamka asaasiga ah ee hage u ah xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland waxaa ka mid ah shan qiyam oo muhiim ah, kuwaas oo dhammaan shaqaalaha iyo nidaamka shaqo ee xafiisku ku hagaan hawlahooda si loo gaaro ujeedooyinka sare ee lagu xaqiijinayo caddaalad waarta iyo adeeg caddaaladeed oo loo dhanyahay. Qiyamkan waa kuwa ka tarjumaya mowqifka, mas'uuliyadda, iyo hannaanka shaqo ee xafiiska.

1. Cadaalad

   Cadaaladdu waa tiirka ugu muhiimsan ee xafiisku ku shaqeeyo, iyadoo ujeedadu tahay in dhammaan dadka Jubaland loo xaqiijiyo caddaalad dhexdhexaad ah, aan dhinac u janjeerin, oo ka madax bannaan wax walba oo saamayn kara nidaamka caddaaladda. Cadaaladdu waa in la daboolo baahiyaha dadka si sinaan ah, iyadoo laga fogaanayo musuqmaasuq iyo eex. Xafiisku wuxuu u shaqeynayaa si loo xaqiijiyo in dadka ay helaan xuquuqdooda si daahfuran, iyadoo la adeegsanayo sharciga si hufan.

2. Madax-bannaani

   Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu ku shaqeeyaa madax-bannaani, isaga oo ka madax bannaan cid kasta ama hay'ad kasta oo isku dayaysa inay saamayn ku yeelato go'aanada xeer ilaalinta. Madax-bannaanidu waxay muhiim u tahay in xafiisku uu guto waajibaadka si xor ah oo hufan, isaga oo aan wax saamayn ah uga imaanin dhinacyo kale. Ujeedadu waa in xafiisku noqdo mid si dhab ah ugu adeega caddaaladda isaga oo aan loo adeegsan dano gaar ah ama cadaadis dibadda ka yimid.

3. Hufnaan

   Hufnaanta waa qiyam muhiim ah oo laga rabo in dhammaan shaqaalaha xafiiska ay u shaqeeyaan si daahfuran, si heer sare ahna u maaraystaan hawlahooda, Hufnaanta ayaa u fududeysa bulshada iyo hay'adaha kale

inay ku kalsoonaadaan nidaamka xafiiska, iyadoo si cad loo qabto dhammaan kiisaska, loona maareeyo hawlaha iyadoo la adeegsanayo habraacyo lagu kalsoonaan karo. Xafiiska wuxuu ku dadaalayaa inuu si hufan u dhaqmo, wuxuuna bulshada siinayaa xog cad oo ku saabsan hawlaha xafiiska iyo sida loo maaraynayo kiisaska.

4. Isla-xisaabtan

   Isla-xisaabtanku waa tiir kale oo muhiim ah oo xaqiijinaya in shaqaalaha xafiisku ay qaataan masuuliyadda iyo waajibaadka shaqo ee la saaray, iyagoo diyaar u ah inay si cad uga jawaabaan habka ay u maamulaan kiisaska iyo adeegyada. Isla-xisaabtanku wuxuu muhiim u yahay in la xoojiyo kalsoonida bulshada, iyadoo la hubiyo in dhammaan kiisaska loo maareeyo hab sax ah. Shaqaalaha ayaa lagu abaabulay inay qaataan masuuliyadda tallaabo kasta oo ay qaadaan, iyagoo diyaar u ah inay caddeeyaan go'aan kasta oo ay qaateen

5. Xirfadlenimo

   Shaqaalaha xafiiska waxaa looga baahan yahay xirfadlenimo sare si ay u gudan karaan waajibaadka culus ee la xiriira xeer ilaalinta iyo caddaaladda. Xirfadlenimadu waxay ka kooban tahay aqoon, waayo-aragnimo, iyo ixtiraamka nidaamka sharci, iyadoo ay tahay in shaqaalaha xafiisku ay si joogto ah u helaan tababaro kor loogu qaadayo xirfadahooda iyo waaya-aragnimadooda. Xirfadlenimada ayaa xafiiska ka caawinaysa inuu u shaqeeyo si tayo sare leh, iyadoo la adeegsanayo hab maamuusyo hufan oo caddaalad ah.

# Kiisaska Soo Gaaray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud 2024

Warbixin Kooban: Kiisaska Soo Gaaray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland 2024

Sanadkan 2024, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland waxa uu helay kiisaska tiro badan oo la xiriira dembiyada kala duwan ee ka dhacay deegaanada jubbaland, kuwaas oo u baahan baaritaan iyo dabagal caddaalad ah. Warbixinta soo koobeysa kiisaskaasi waxay ka tarjumeysaa tirada iyo noocyada kiisaska soo gaaray xafiiska iyo sidoo kale habraacyada kala duwan ee loo maray maaraynta kiisaskaasi. Hoos waxaa ku xusan noocyada kiisaska, tirada iyo qaababka lagu maareeyay:

1. Kiisaska Dembiyada Tuuganimada

- Tirada: 85 kiis

- Nooca: Kiisaska ugu badan waa kuwa xatooyada ama tuuganimada kuwaas oo ah kiisaska ugu badnaa sanadkan dhamaaday ee 2024.

- Maareynta: Kiisaskan waxaa loo qoondeeyay xeer ilaaliyeyaasha khibradda u leh si baaritaanno dheeraad ah loogu sameeyo, iyadoo xafiisku xooga saaray sidii loola shaqeyn lahaa laamaha kale ee caddalada bahwadaagta yihiin.

2. Kiisaska La Xiriira jaraaxada ama dhaawacyada dadku isgaarsiiyaan ee xafiiska soo gaaray sanadkan sii dhamaanaya waa

- Tirada: 43 kiis

- Nooca: Dembiyada la xariira jaraaxada waa kiisaska soo labaaya ee sanadkan soo gaaray xafiiska.

- Maareynta: Waxaa lagu guu leystay in guud ahaan kiisaska loo gudbiyay maxkamda madaama uu yahay kiisas inta badan soo laalaabta.

3. Kiisaska La Xiriira Dembiyada Maandooriyaha

- Tirada: 7 kiis

- Nooca: Kiisaska maandooriayaha oo ah kiisaska xafiiska sanadkan soo gaaray

- Maareynta: Xafiisku wuxuu adeegsaday xeer ilaalin xirfad leh oo u kuur gasha dhammaan caddeymaha la xiriira kiisaska maandooriyaha, iyadoo baaritaano qoto dheer ah lagu sameyay laguna guulaysaty in cadaalada la marsiiyo dhamaan kiisaska maandooriyayaasha.

4. Kiisaska Dembiyada Bulshada iyo Anshaxa

- Tirada: 29 kiis

- Nooca: Kiisaska dembiyada bulshada oo ay ka mid yihiin tacaddiyada, dhibaataynta iyo falalka ka dhan ah anshaxa guud.

- Maareynta: Kiisaskan waxaa la sii marsiiyay wacyigelin iyo talaabooyin lagu taageerayo dhibbanayaasha, iyadoo sidoo kale loo qaybiyay shaqaalaha ku takhasusay anshaxa iyo ilaalinta bulshada.

5. Kiisaska kufsiga ah

- Tirada: 26 kiis

- Nooca: Kiisaskan waxaa ka mid ah tacaddiyada iyo ku xadgudubyada xuquuqda haweenka iyo carruurta.

- Maareynta: Waxaa loo sameeyay waax gaar ah oo u xilsaaran inay xalliyaan kiisas khuseeya xuquuqda haweenka iyo carruurta, iyadoo loo marayo habraacyo u gaar ah ilaalinta xuquuqaha.

6. Kiisaska La Xiriira dilka ama dhimashada waa

- Tirada: 12 kiis

- Nooca: Dembiyada la xariira dilka oo iskugu jira kuwa kas ah iyo kas dhaaf ah ee sanadkan soo gaaray xafiiska.

- Maareynta: Waxaa jira waax u gaar ah dambiyada culculus oo ku taqasuustay sidii loo maareynlahaa dambiyada culculus waxaa la marsiiyay habraacii loogu talagay dambiyada waaweyn waxaana lagu guulaystay in cadaalada la marsiiyay.

7. Kiisaska La Xiriira Burburinta waa

- Tirada: 2 kiis
- Nooca: Dembiyada la xariira burburinta ah ee sanadkan soo gaaray xafiiska.


- Maareynta: Waxaa jira waax u gaar ah dambiyada noocaan oo kala ah inta badan waa danbiya soo laalaban jiray balse sanadkan uu hoos udhac ku yimid taas tusinaysa in kiisaska qaar isbadal ku imaaday marka loo eego sanadkii tagay.

## Warbixinta kiisaska xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee jubbaland

Celceliska kiisaska xafiiska xeer ilaalinta soo gaaray waa 239 kiis waxayna kala yihiin 204 kiis oo xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee degmadda kismaayo halak 35 kiis laga diiwaangeliyay xafiiska degmadda dhobley.


| Xukun | Eedka labasho | Gal Xeris | Socda | Tirada guud |
|---|---|---|---|---|
| 122 | 9 | 51 | 22 | 204 |

## Kiisaska degmada kismaayo.




Kiisaska degmada Dhobley.

| Xukun | Eedka labasho | Gal Xeris | Socda | Tirada guud |
|---|---|---|---|---|
| 20 | 4 | 6 | 5 | 35 |





**Noocyada Dambiyada kiisaska soo gay xafiiska kismaayo**

| Tuuganimo | Anshaxumo | Jaraaxo | Burburin | Dhimasho | Kufsi | Maandooriye | Tirada Guud |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 85 | 29 | 43 | 2 | 12 | 26 | 7 | 204 |



Noocyada Dambiyada kiisaska soo gay xafiiska Dhobley

| Tuuganimo | Anshaxumo | Jaraaxo | Burburin | Dhimasho | Kufsi | Maandooriye | Tirada Guud |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 13 | 4 | 7 | 0 | 5 | 4 | 2 | 35 |




**Foomka Warbixin Garsoorka Dowladaha Xubnaha ka ah Federalka 2024**
**Dowladda Jubbaland**
**Warbixinta Xeer-Ilaalinta Jubbaland**

| Gobolka Jubada hoose Degmadda Kismaayo | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Nooca dembiga | Tirada eedeysanayaasha | Galal la furay | Socdo | La xiray | Xukun | |
| | | | | | Beri | Dembiile |
| Tuuganimo | 85 | **85** | **8** | **15** | **12** | **50** |
| Anshaxumo | 29 | **29** | 3 | 4 | 2 | 20 |
| Jaraaxo | 43 | **43** | 5 | 30 | 6 | 2 |
| Burburin | 2 | **2** | 2 | 0 | 0 | 0 |
| Dhimasho | 12 | **12** | 3 | 3 | 0 | 6 |
| Kufsi | 26 | **26** | 1 | 6 | 0 | 19 |
| Maandooriye | 7 | **7** | 0 | 2 | 0 | 5 |
| **Wadarta** | **204** | **204** | **22** | **60** | **20** | **102** |

## Gabagabo

Warbixin Sanadeedka 2024 ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland Sanadka 2024 wuxuu Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland u ahaa sanadkii horumarinta nidaamka caddaaladda iyo xoojinta adeegyada loo fidiyo bulshada. Xafiisku wuxuu mudnaan siiyay hirgelinta nidaamyo cusub oo la xariira maaraynta kiisaska, isla-xisaabtanka, iyo sare u qaadidda xirfadaha shaqaalaha iyada oo loo marayo tababaro joogto ah. Waxaa sidoo kale la qaatay xeer ilaaliyeyaal cusub si loo daboolo baahida sii kordhaysa ee cadaaladda ka jirta degmooyinka kala duwan ee Jubaland.

Xafiisku wuxuu sameeyay horumar la taaban karo oo la xiriira ka-hortagga musuqmaasuqa iyo sugidda amniga, isagoo sidoo kale dib-u-eegis ku sameeyay habraacyada baarista iyo isku xirka laamaha kala duwan ee caddaaladda. Waxaa si joogto ah looga shaqeeyay tababaro aqooneed oo muhiim ah kuwaas oo ay shaqaalaha ku barteen xirfado cusub, taasoo ka caawisay maaraynta kiisaska iyo in adeegyada bulshada loo fidiyo si hufan.

Inkasta oo la gaadhay guulo badan, xafiisku wuxuu wajahaa caqabado ay ka mid yihiin yaraanta shaqaalaha iyo qalabka casriga ah ee shaqada lagu fududeeyo. Si kastaba ha ahaatee, dadaal ayaa la galay sidii loo heli lahaa nidaam caddaaladeed oo lagu kalsoonaan karo, si loo xaqiijiyo in bulshada Jubaland ay hesho adeeg caddaaladeed oo hufan, madax-bannaan, oo waafaqsan qiyamka iyo shuruucda dalka.

Ujeedada sanadka soo socda ayaa ah in xafiisku sii wado kobcinta nidaamyada shaqo, xoojinta isla-xisaabtanka, iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaha si loo gaaro yoolka ugu weyn ee ah in dadka Jubaland ay helaan caddaalad sugan oo dhammeystiran. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland wuxuu sii wadi doonaa inuu sameeyo dib-u-eegisyo muhiim ah, isagoo xoojinaya kaalmada uu siiyo shacabka, si bulshada loogu xaqiijiyo kalsoonida nidaamka caddaaladda ee gobolka.